


Kitaabka Quduuska ah ee  
loogu talo galay Carruurta  
Soo-jeedinayaa



Janno,  
Guriga  
Ilaah ee  
Qurxoon



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus  
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service  
email: [zemendale@gmail.com](mailto:zemendale@gmail.com)  
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children  
[www.M1914.org](http://www.M1914.org)

©2020 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato  
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Markii Ciise uu ku noolaa dhulka wuxuu xertiisa u sheegay waxyaalo ku saabsan Jannada. Waxa uu ku magacaabay "Guriga aabbahay", waxaanu sheegay inay halkaas jiraan qolal guryo badani. Waa guryo waa weyn oo qurxoon.



Jannadu waxa ay ka weyntahay oo ay ka qurux badantahay guri kasta oo ku yaalla dhulka.



Ciise wuxuu yidhi, "Waan tegi doonaa si aan meel idiinku sii diyaariyo. Oo haddii aan u tago inaan meel idiin sii diyaariyo, dib ayaan u soo laaban doonaa oo anigaa idin qaadan doona."



Ciise wuxuu tagay jannada markuu dhimashada ka sarakacay dabadeed. Xertiisii iyaga oo daawanaya ayaa Ciise sare loo qaaday, waxaana iyaga araggooda ka qarisay daruur.



Ilaa markaas kadib, Masiixiyiintu waxa ay xasuustaan ballanqaadkii Ciise ee ahaa inuu soo laaban doono oo qaadan doono iyaga. Ciise wuxuu sheegay inuu si kedis ah u iman doono, wakhti ay kuwo tiro yari filayaan imaatinkiisa. Laakiin waa sidee xaaladda Masiixiyiinta dhintay soo noqoshadiisa ka hor? Kitaabka Quduuska ahi wuxuu leeyahay kuwaasi waxay si toosa uugu tegi doonaan




**SAYIDKA LA  
JOOGAAN**

Ciise. In jidhka ay ka maqnaadaani waxa weeyi inay Sayidka la joogaan.



Muujintii, oo ah Kitaabka uugu danbeeya Kitaabka Quduuska ahi, wuxuu inoo sheegayaa sida Jannadu cajiibka u leedahay. Waxa uugu la yaabka badanina waa iyadoo Jannadu ay tahay guriga Ilaah. Ilaah

waxa uu joogaa meel kasta, laakiin carshigiisu wuxuu ku yaallaa Jannada.




Malaa'igaha iyo makhluuqaadka kale waxay Ilaah ku caabudaan Jannada. Sidoo kale, dhammaanba dadka Ilaah ee dhintay ee jannada tegayna sidaas ayay yeelayaan.

Waxay Ilaah uugu heesayaan qasiidooyin Ilaah ammaan ah.

Qasiido ka mida kuwa ay ku heesayaani

waxay leedahay sidan:






ADIGU WAXAAD ISTAAHISHAA  
INAAD KITAABKA QAADATO  
OO AAD SHAABADIHIISA  
FURTO; WAAYO, WAA LAGU  
GOWRACAY, OO WAXAAD  
ILAAH DHIIGGAAGA UGU  
SOO IIBISAY DAD AH QABIIL  
KASTA IYO  
AF KASTA  
IYO DAD  
KASTA IYO  
QURUUN  
KASTA.

(Muujintii  
5:9)




Bogagga uugu danbeeya Kitaabka Quduuska ahi waxa ay Jannada ku tilmaamayaan "Yerusaalemta Cusub." Waxa weeyi mid aad iyo aad u weyn, oo gidaar sarreeya ku leh dibadda.

Gidaarku waxa uu samaysan yahay dhagaxaan aad qaali u ah.



Dhagxaan qiimehoodu qaali yahay ayaa asaas u ah gidaarkan, waxaanay bixinayaan midabbo kala duwan oo indhaha soo jiidanaya. Mid kasta oo ka mida albaabada magaaladu waxa uu ka samaysan yahay luul aad u weyn!



Albaabadaas waaweyn ee luulka ka samaysan weligood  
lama xidhayo. Aynu tagno oo eegno meeshaasi sida ay  
tahay ... WOW! Jannada gudeheeda ayaa intaas aad  
uugasii qurux badan. Magaaladu waxa ay ka samaysan

tahay dahab khaalis u  
ah sida muraayadda.

Xitaa dariiqu  
waxa uu ka  
samaysan




yahay  
dahab.




Webi qurux badan oo cad ayaa ku burqanaya biyaha nolosha ee kasoo qulqulaya carshiga Ilaah. Labada dhinac ee webiga waxa ku yaalla geedka nolosha, kaasoo hore uugu oolli jiray Beer Ceeden. Geedkani waa mid gaar ah. Waxa uu dhalaa labo iyo toban nooc oo midho kala duwan ah, bil kastana waxa uu dhalaa nooc kala duwan. Caleemaha geedka noloshuna waxa ay caafimaad u yihiin quruumaha.



Jannadu iftiin uugama baahna cadceedda ama dayaxa toona. Ammaanta Ilaah ay ka buuxinaysa Jannada iftiin cajiib leh. Halkaasna weligeed ma ahaan doono wax habeen ahi.



Xitaa xayawaanka ku nool Jannada dhexdoodu waa kuwo nooc kale ah. Wakhti kasta waxa weeyi kuwo saaxiib ah. Yeyda iyo wananku waxa ay wada daaqayaan cawska. Xitaa libaaxyada xoogga waaweyni waxay cunayaan midho dibiyada oo kale ah. Ilaah waxa uu leeyahay, "Ma waxyeellayn doonaan oo ma baabi'in doonaan waxa dhammaan ku sugan buurtayda quduuska ah."



Marka aynu hareeraha eegno, waxaynu arkaynaa waxyaalo ka maqan Jannada oon lagu arkaynin. Laguma maqlayo jannada dhexdeeda ereyo cadho leh. Ma jiro qof dagaallamaya ama damaaci ahi.

Albaabadu maaha kuwo qufulan ama xidhan, waayo Jannada dhexdeeda tuugo ma jirto.





Ma jiraan beenaalayaal, kuwo dadka dila, kuwo  
awood gaara sheegt, iyo kuwo xumaanfalayaal ahi  
toona. Ma jiro Jannada dhexdeeda wax denbi ahi  
nooca uu  
doonaba ha  
noqdee.




Jannada marka Ilaah lala  
joogo ma jiraan wax oohin  
ahi. Mararka qaar dadku  
waxay u ooyaan Ilaah  
maadaama oo noloshan  
dhexdeeda ay murugo  
jirto. Laakiin Jannada  
dhexdeeda Ilaah waxa uu  
meesha ka saari doonaa  
oohinta oo dhan.




Jannada dhexdeeda dhimasho ma jirto sidoo kale.  
Dadka Ilaah waxa ay weligoodba la jiri doonaan  
Ilaah. Ma jiri doonto murugo, ma jiri doonto oohin,  
ma jiri doono xanuun.

Ma jiri doono  
bukaan, qof loo  
baroorto, iyo aas  
lagasoo qayb  
galo. cid kasta  
oo Jannada  
joogtaa waxa  
ay weligeed  
farxad kula  
jiri doonaan  
Ilaah.



Intaasoo dhan waxa kasii fiican, Jannadu waxay u ahaatay innamada yaryar iyo hablaha iyo dadka waaweeyn ee rumaystay Ciise Masiix inuu yahay Badbaadiyohooda iyagoo markaasna u addeecay isagoo ah Sayidkooda. Jannada waxa yaalla kitaab la yidhaahdo Kitaabka Noloshaha ee Wanka. Waxa ku qoran oo ka buuxa magacyada dadka. Miyaad garanaysaa cidda magacyadoodu ay halkaas ku qorantahay? Waa dadka dhammaan isku halleeyay Ciise.

Magacaagu halkaas haddaba ma ku qoran yahay?



Ereyada ugu danbeeya Kitaabka Quduuska ah ee ku saabsan Jannadu waxa weeyi casuumitaan la yaab leh. "Ruuxa iyo aroosadduba waxay yidhaahdaan, Kaalay. Oo kii maqlaana ha yidhaahdo, Kaalay. Oo kii harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba biyaha

nolosha  
hadiyad  
ahaan

ha  
u  
qaato."



Janno, Guriga Ilaah ee Qurxoon

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,  
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yooxanaa 14; 2 Korintos 5;  
Muujintii 4, 21, 22

"Erayadaada furniinkoodu wax buu  
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!  
Yooxanaa 3:16

